

"WAAN KA CABSAN INAAN KA  
CAWDO."

Waa sharci-darro in laga argoosto qof ayadoo laga cabanayo handadaad aan sharci ahayn, u gaynta cabasho Golaha, ama caawinta baadhidda dacwadda ee Golaha.

Haddii aad tahay mulkiile ama maareeye, ha ula dhaqmin qof kaasoo ka cawday handadaad guri si ka duwan kiraystayaasha kale.

Haddii aad kirayste tahay, waxaad la  
soo xidhiidhi kartaa Golaha Xuquuqda  
Aadanaha haddii laguu gaystay aargoosi  
ah u sheegid handadaad mulkiilahaaga  
ama maareeyahaaga ama maadaama ood u  
gaysay cabasho Golaha.

QOF KASTA WUXUU U  
ISTAAHILAA GURI CABSI KA  
MADAX BANAAN!

Si aad u keentid dacwad ama xog dheer  
ah, la xidhiidh:

## Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine

Dirid: 51 State House Station  
Augusta, Maine 04333-0051

**Street Address:** 19 Union Street

Websavd: [www.maine.gov/mhrs](http://www.maine.gov/mhrs)

Taleefoon: (207) 624-6290

TTY: Maine Relay 711

Frankis (207) 624-8729

## Goormay Handadaadda Guri tahay Sharci-darro?

Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine wuxuu ka dhigaa sharci-darro in laysku takooro xeerarka, shuruudaha ama xuquuqda kirada ee guri dagid kasta arrimo ku salaysan farac, midab, sinji, xidhiidh galmo, naafo muuq ama maskax ah, diin, duriyad, qolo, ama fir qoys. 5 M.R.S.A. §4582.

Handadaad ku salaysan qof ah qaybta la dhawray waa qaab ah takooridda guri ee sharci-darrada ah marka heerarka soo socda ay waafqaan:

1. Handadaadda aan la jeclaysan.
  2. Handadaad bay ahayd sababtoo ah bartilmaameedka qaybaha la dhawray (sida, farac, sinji, iwm.).
  3. (a) Handadaaddu way darnayd ama mid baahsan oo keentay cadaawad ama wax-yeelo deegaan guri, ama  
(b) Guri bixinta waxaa si cad ama si dahsoon shardi laga dhigay kiraystaha ayadoo lagu dirqinayo dhaqan aan la jeclaysan (sida, ka ganacsi kirada rabitaan galmo).

Marka handade uu yahay sii kirayste, mulkiile ama maareeye guud ahaan masuul ayuu ka yahay haddii ay am uu ogaado ama la ogaysiiyay handadaadda oo uu ku guul daraystay in uu ka qaado talaabo dagdag ah oo haboon si uu u joojiyo handadaadda.



HANDADA ADDA  
GURI EE SHARCI-  
DARRADA AH

TILMAANTA  
KIRAYASTAYAAS  
HA IYO  
MULKIILAYAASHA



## HANDADAADDA GURI EE SHARCI-DARRADA AH

Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine wuxuu mabnuucdaa handadaadda guri dagidda ee ku salaysan farac, midab, sinji, xidhiidh galmo, (taasoo sidoo kale ay ka mid tahay labo sinjiile iyo ninoo-naag), naafo muuq ama maskax ah, diin, duriyad, qolo, fir qoys (leh hal ama caruur badan oo yaryar) ama hela kaalmada dadwayne.

Handadaaddu waxay noqon kartaa hadal ama ficiil. Hal jabinta xeerka oo handadaadda ah, sida ficiil handadaad, waxay noqon kartaa sharci-darro. Handadaadda sharci-darrada ah sidoo kale waxay keeni kartaa dhacdooyin khatar ah taasoo ay ku jiri karto, tusaale ahaan, handadaad, waydiimo shukaansi, ama wax burburin.

### ■ ■ ■ MUHIIM ■ ■ ■

Handadaadda waxaa xukuma sida ficiiku u dareemo qofka iyo waxa uu gafku ku yahay qofka caadiga ah.

Xataa haddii handadayaal badan ay u dareemayaan in dhaqankoodu yahay maad, faanid, ama waxyeelo la'an, ficiikoodu waa sharci-darro haddii si aan macquul ahayn u fara-gashado isticmaalka iyo raaxaysiga kiraystaha ee gurigooda.



## TUSAALAYAAL DHAWR AH

### **Handadaad qabiil ama qoomiyad waxaa ka mid noqon kara:**

- Kaftamada ama dacaayadda qabiil;
- Ku qoslidda ama cayda qof qoladii ama durayaddii darteed;
- Burburinta qof hantidii sababtoo ah wuxuu ama waxay u dabacsantahay dadka faraca kala duwan.

### **Handadaadda galmo waxaa ka mid noqon kara:**

- Samaynta galmo gaabsi, codsasho ama sheegaysa ina aan la jeclaysan;
- Adeegsi dacaayad sida, "naag ragga rabta";
- Siinta ganacsi lagu kireynayo galmo ama la diidayo in la sameeyo dayactir in qofka uu bixiyo rabitaan galmo mooyaane.

### **Handadaadda naafo waxaa ka mid noqon kara:**

- Dhaadhaajinta ciladdiisa jidheed;
- Adeegsiga magacyo liidis ah sida "maan laawe" ama "jiis";
- Silcinta qof adeegsigiisa xayawaan.

### **Handadaadda xidhiidhka galmo waxaa ka mid noqon kara:**

- Adeegsiga dacaayad sida "khaniis" ama "khaniisad";
- U dhaafidda fariimo handadaad albaabka ama taleefoonka;
- Ku tuuridda wax ama weerarid toos ah qof xidhiidhkooda galmo dartii.

## WAXAAN AHAY KIREYSTE. MAXAAN KU SAMAYN KARAA HANDADAADDA?

Hubi handadaha inuu ogaado inaad doonayo in uu ficiilka joojiyo.

Haddii si toos ah laguu soo weeraray ama laguu hanjabay, waa inaad wacdaa booliska sida ugu dhakhso badan.

Haddii mulkiilha ama maareeyaha uu sameeyo dacwad, hubi in la sameeyo dacwad sidaa darteed waxay hagaajin karaan xaaladda.

Sidoo kale waxaad la xidhiidhi Kartaa Golaha Xuquuqda Aadanaha wakhti kasta si looga wada hadlo dacwad samaynta.

## WAXAAN AHAY MULKIILAH AMA MAAREEYAH. MAXAY TAHAY INAAN KA QABTO DACWADDA HANDADAADDA?

Samee waxaa aad kaga hortagi kartid dhicidda handadaadda. Kordhi oo u qaybi shaqaalahaaga iyo kiraystayaasha siyaasadda mabnuucaysa handadaadda oo sii nidaamka warbixinta.

Qabo cabashada handadaad oo kirayste kasta si aad ah. Baadh cabasho kasta dib-dhac la'aan. Qaad talaabo dhaqan gal ah oo dagdag ah haddii ay cabashadu tahay dhab. Go'aami awoodaha kuu banana ooy ka mid yihiiin, digniin, guri ka saarid, iyo shaqo ka joojinta handadaha.

